

Maxay takooridu u egtahay xaalada guriyeynta?

Waa maxay takoorid

Takooriddu waa ficil ama go'aan in qof ama koox loola dhaqmo si xun sababo ay ka mid yihiin jinsiga, da'a, ama naafonimo (Guddiga Xuquuqda Aadanaha Kanada, 2018).

Maxay takooridu u egtahay xaalada guriyeynta?

Takooriddu waxay noqon kartaa qaabab kala duwan. Waxay noqon kartaa wax uu qof sheego ama sameeyo. Waxay noqon kartaa siyaasada goobta shaqada ama deganaanshaha dhismaha.

Takooriddu badanaa waxay ku salaysan tahay fikrad balaadhan.

Fikrad balaadhan waa sawir muuqda ama feker ku saabsan qof gaar ah ama shay.

Tusaale: Suurto-galnimada in hooyada kelida ah ay u badan tahay inay la kulmaan xoog-muquunis dhinaca guriga iyo wareegyada guri ka saaridda.

“Waxaan aaday guri dabaq ah oo ay ila socotay gabadheyda 4-jirka ah. Milkiilaha ayaa yidhi inuusan iga kireynayn guriga sababtoo ah ma uusan dooneyn inaan dhibaato u keeno dhismihiisa.”

Faallooyinka mulkiiluhu wuxuu noqon karaa midabtakoor ka dhan ah hooyada oo ku salaysan jinsigeeda, xaaladda guurka, ama xaaladda qoyska.

Tusaale: Maamulaha hantida ayaa garaacay albaabka nin mar kasta oo uu dhismaha uu kasoo carfo geedka marijuana sababtoo ah wuxuu yahay kiraystaha keli ah ee dadka tirada yar ee muuqda.

“Waxaan ahay kirayste wanaagsan. Kirada ayaan waqtigeeda ku bixiyaa, booskeyga waxaan ku ilaaliyaa nadiif, kor uma qayliyo. waxaan dareemayaa aragti aan xaq ahayn in layga sameeyey wax igu saabsan aniga.”

Ficilada maamulaha hantida ayaa noqon kara midabtakoor ka dhan ah ninka oo ku saleysan jinsigiisa, midabka, ama meesha uu ku dhashay.

Tusaale: Mulkiiluhu ma cusbooneysiyo heshiiska kirada waayeelka ka dib markii uu qofka weyni xanuunsado oo uu bilaabo isticmaalka kursiga curyaanka.

“Waxaan halkaan ku noolaa muddo 25 sano ah, laakiin hadda mulkiiluhu ma cusbooneysiin doono heshiiska kirada.”


ficilada mulkiiluhu wuxuu noqon karaa midabtakoor ka dhan ah dadka waaweyn oo ku saleysan da'diisa ama naafanimada jirka.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta wuxuu ku siin karaa macluumaad bilaash ah oo qarsoodi ah oo ku saabsan Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta iyo sida ay uga caawiso ilaalinta marka aad kireysanayso.

Cabashooyinku waxay ubaahanyihiin in lagu buuxiyo Ingiriisi. Waxaad caawinaad ka heli kartaa shaqaalaha dejinta ama bixiyaha adeegga bulshada. Haddii dhageysiga dacwadaada loogu talagalay cabashadaada, waxaad weydiisan kartaa Guddiga Xuquuqda Aadanaha inuu isticmaalo luqad aan ahayn Ingiriisiga ama uu isticmaalo turjumaan. Waa inaad codsataa turjumaan ka hor dhegeysigaaga.

Si aad ula xiriirto Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta, shabakadan gal



Alberta
Human Rights Commission

www.albertahumanrights.ab.ca

Waxaan jeclaan lahaa inaan u mahad celino haweenka kanadiyaanka Soomaalida iyo ururka caruurta ee nala wadaagaya anaga mashruucan.



Waa inaad ku tiirsanayn daabacaddaan talobixin sharciyeed. Waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo ku saabsan sharciga Alberta oo keliya.

Daabacaaddani waxay qiraysaa maalgelinta ay bixiso Alberta ee Waxbarashada Xuquuqda Aadanaha iyo Sanduuqa maal-gelinta Dhaqamada kala duwan.



Human Rights
Education and
Multiculturalism
Fund

Centre for
Public
cplea
Legal Education
Alberta

© June 2018, Legal Resource Centre of Alberta Ltd.
Operating as: Centre for Public Legal Education Alberta

www.cplea.ca